


Map of Somalia

Write for your FREE DVD

**The Life of Jesus Christ**

**in SOOMAALI**




**Samaritan Foundation**
P.O, Box 20712
Waco, Texas 76702

# Ciise Masiixi oo Lagu Sheegay Quraanka iyo Baybalka



**Jesus the Messiah as found in the Qur'an and the Bible**

**in the Somali language**

# CIISE MASIIX OO LAGU SHEEGAY QUR'AANKA IYO BAYBALKA

Qaybta 1

Qur'aanku wuxuu leeyahay

## Ciise Masiix Wuu Imanayaa Markale

**UGU HORAYN**: Isagoo ka hadlaya imaanshaha labaad ee Ciise, Dr. M.T. Al-Hilali, Ph. D. oo ah brofisoor kulliyadda Islaamka ee Medina, wuxuu yidhi, "Waxaan jeclaan lahaa inaan xusuusiyo akhristaha in Ciise, ina Maryan uu adduunkan ku soo laabanayo maalinta qiyaamaha ka hor." Dr. Hilali wuxuu xusay laba waxyaabood:

**B. Qur'aanka:** "Isaga (Ciise ina Maryan) wuxuu noqonayaa calaamad lagu garanayo saacadda imanaysa (Maalinta Qiyaamaha) (taasi macnaheedu waxaa weeye ku soo noqoshada Ciise ee adduunka korkiisa). Sidaas darteed, wax shaki ah ha ka qabin. Haddaba aniga i soo caaca (waa Ilaah) (taasi macnaheedu waxaa weeye adeec Ilaah oo samee wixii uu kugu amray inaad samayso, bini aadamkow!) Jidka toosan waa midkaas. "Suuradda #43 Zukhruf: 61 "Hana u oggolaan shaydaanku inuu kaa celiyo (diinta saxda ah). Hubaal isaga (shaydaanku) wuxuu idiin yahay cadaw muuqda." Suuradda #43 Zukhruf : 62 "Oo markuu Ciise la yimid calaamooyin bayaan ah wuxuu yiri: 'Waxaan idiinku imid xigmad iyo inaan bayaan idiinka dhigo arrimo qaarkood oo aad ku kala duwan tihiin, sidaas darteed ka baqa Ilaah oo i addeeca'. Suuradda #43 Zukhruf : 63

Macnaheedu waxaa weeye:

**Qur'aanku wuxuu leeyahay addeeca Masiix.**

**T. Xadiis #425 iyo Xadiis #657**

Muxammad wuxuu yiri (sida uu soo wariyey Abu-Hurayra): Resuulka Ilaah wuxuu yiri: "Isaga kaasoo gacantiisa ay naftaydu tahay, (Ciise) ina Maryan wakhti gaaban ayuu idinku soo dhex degayaa idinka (Muslimiinta) sida taliye xaq ah (mana aha sida Rasuul).

Shahih al Bukhari, Vol III

Xadiis #425 iyo Vol. IV iyo Xadiis #657

Dr. Hilali waxaa kaloo uu sheegay sababta soo laabashada Ciise Masiix inay tahay inuu noqdo HOGGAAMIYE iyo TALIYE ummadaha Muslimiinta dhexdooda sida lagu muujiyey Qur'aanka.
Su' aashu waxaa weeye:
Muxuu Ilaah ugu soo dirayaa Ciise markale inuu noqdo Hoggaamiye iyo Taliye ummadaha Muslimiinta dhexdooda? Muxuu u soo diri waayay nebi kale oo muuqday Isaga hortii ama xataa mid sheegtay nebi oo muuqday Masiixa kaddib? Kan uu soo dirayaa muxuu u noqday Ciise Masiix?

## WAAYO CIISE MASIIX?

Qur'aanku wuxuu sheegayaa: Ciise Masiix inuu u imanayo inuu TALIYO oo XUKUMO.
Majiro nebi ka horeeyay ama ka dambeeyay Ciise Masiix oo lagu sheegay Qur'aanka inuu fulinayo labadaas shaqo ee kor lagu soo sheegay.
**TAN LABAAD:** Qur'aanku wuxuu leeyahay: Ciise Masiix waa QAWLKA ILAAH (Suuradda #3 Al-Cimraan: 45) "Bal eeg! Malaaqyadii ayaa yiri: 'Maryaney! ILAAH wuxuu ku siinayaa adiga bishaaro farxad leh oo ah Qawl Isaga ka yimid: Magaciisu wuxuu noqon doonaa Ciise Masiix.' Su'aal: Nebi kale ma sheegan karaa inuu yahay QAWLKA ILAAH?
**TAN SADDEXAAD:** Qur'aanku wuxuu leeyahay: Ciise Masiix waa Ruux Rabbiga ka yimid. "Ciise Masiix, ina Maryama, wuxuu ahaa Rasuulka Ilaah iyo QAWLKIISA uu ku soo dejiyay Maryama iyo Ruux Isaga ka yimid." - (Suuradda #4 Nisaa: 171). Su'aal: Markale nebi kale ma sheegan karaa inuu yahay Qawlka Ilaah iyo RUUX ISAGA KA YIMID?
**TAN AFARAAD:** Qur'aanku wuxuu ku wacdinayaa dhalashada Ciise Masiix uu bikrad ka dhashay. Waxay tiri Maryan: "Rabbigaygoow! Sidee baan uur ilmo ku yeelan karaa mar hadduusan ninna i taaban?"
(Suuradda #3 Al-cimraan: 47).
Su'aal: Maxaa loogu doortay Masiixa inuu sidaa khaaska ah u dhasho? Qof isaga ka horeeyay ama ka dambeeyey oo sidaa mucjisada leh oo aan la rumaysan karin ku dhashay ma jiro. Muxuuse sidaa u noqday Masiixu? Muxuu Ilaah u doortay inuu soo dhex galo arrimaha sida dabiiciga ah u socda?



**TAN SHANAAD:** Qur'aanku wuxuu leeyahay: Ciise Masiix wuu wacdin jiray ilaa caruurnimadiisa. Wuxuu la hadlay dadka caruurnimadiisii iyo markuu waynaadayba. Oo Isaga (Ciise) wuxuu ku jiri doonaa kooxda qumman oo xaqa ah. (Suuradda #3 Al- Cimraan : 46).
Su'aal: Nebi kale ma sheegan karaa inuu xaqaani yahay?
**TAN LIXAAD:** Qur'aanku wuxuu sheegayaa in Ciise Masiix uu adduunka ugu noolaa inuu dadka ku hoggaamiyo Runta iyo inuu sameeyo mucjisooyinka ugu waaweyn oo ay ka mid yihiin soo noolaynta qof dhintay! (Suuradda #3 Al-Cimraan: 49).

## MA ORAN KARTAA CIISE WUXUU AHAA NEBI OO KELIYA?

Qaybta 2

## WAA KUMA CIISE MASIIX?

Qur'aanku wuxuu leeyahay: "Ka cabsada Ilaah oo addeeca Ciise." (Suuradda #43 Zukhruf : 63) **Waa kuma Ciise Masiixaan ay tahay inaan addeecno?** Ciise Masiix waa Qawlka Ilaah. Waa muujinta Ilaah uu qudheena isku keen muujiyay. (Suuradda #3 Al-Cimraan : 45).

Qaamuuska Webster wuxuu ku macnaynayaa erayga "Qawl" inuu yahay muujinta maanka iyo raalliga Ilaah yahay. Maanka Ilaah waa waxa uu Ilaah yahay; Waa ismuujinta qudhiisu uu innaga xaggeena isku muujiyay. Doonista Ilaah waa waxa uu Ilaah doonayo ee uu innaga inaga damacsan yahay.

Haddaba Ciise Masiixi, waa fasiraadda Ilaah uu anaga noo fasirayo si aan ku fahmi karno, sido uu u eg yahay iyo waxa uu naga doonayo.

Si aan si fiican ugu fahamno qofka uu yahay Ciise Masiix, waa inaan eegnaa qaar ka mid ah mucjisooyinkii iyo xaaladihil khaaska ahaa ee noloshiisa ku hareeraysnaa sida ku xusan Qur'aanka iyo Injiilka (Baybalka) labadaba.

| QURAAN | INJIILKA |
| --- | --- |
| Lambarka Suuradda, Magaca iyo aayadda | Kitaabka Baybalka Suuradda iyo aayadaa |

## UURAYSIGII MUCJISADA LAHAA EE MARYAN

Suuradda #21 Anbiyaa: 91
"Oo (xusuusta) iyada taasoo ilaalisay daahirnimadeeda. Waxaan iyada ku afuufnay Ruuxeena, oo waxaan iyada iyo wiilkeeda uga dhignay calaamad dadka oo dhan."

Matayos 1:20-21 "Laakiin intuu waxaan ka fiirsanayay ayaa Malaa'igtii Rabbigu riyo ugu muuqatay, iyadoo leh, Yuusuf ina Daa'uudow, ha ka baqin inaad naagtaada Maryan qaadatid, waayo wax ay uuraysatay ayaa Ruuxa Qoduuska ah ka yimid. Oo waxay umuli doontaa wiil, magaciisana waxaad u bixin doontaa Ciise, waayo dadkiisa ayuu dembiyadooda ka badbaadin doonaa."

## BIKRADDII WAX DHASHAY

Suuradda #19 Maryan: 20,21
"Waxay tiri; Sidee baan wiil ku yeelanayaa, iyadoo uusan ninna i taaban, mana ahi qof aan daahir ahayn?"

Luukos 1:30-32, 34 "Malaa'igtil baa ku tiri, 'Ha baqin Maryaney, waayo nimco ayaad Ilaah ka heshay. Bal eeg waad uuraysan doontaa, oo wiil baad ummuli doontaa, Magaciisana waxaad u bixin doontaa Ciise. Nin wayn buu ahaan doonaa, waxaana loogu yeeri doonaa wiilka kan ugu sarreeya,' Kolkaasaa Maryan waxay Malaa'igtii ku tiri, 'Sidee baa waxanu ku noqon doonaan? Anigu ninna garan maayo.'"



## MASIIXA BARAKADEYSAN

Suuradda #19 Maryan: 30,31
"Wuxuu yiri: Runtii waxaan ahay adeege Ilaah. Wuxuu i siiyay muujin, wuxuuna iga dhigay nebi; wuuna i barakeeyey meel walba oo aan tago, wuxuuna igu xiray salaad iyo sadaqo in alla intaan noolahay."

Matayos 21:9 "Dadkii badnaa oo hor socday iyo kuwii daba socday waxay ku qayliyeen, 'Hoosanna ha u jirto ina Daa'uud. Waxaa barakadaysan kan Rabbiga magaciisa ku imanaya, Hoosanna ha ku jirto meelaha ugu sarreeya.'"

## CIISE WAXAA HOGGAAMIYAY RUUXA QUDDUUSKA

Suuradda #2 Baqara: 253
" . . . Ciise, ina Maryama, waxaan siinay (calaamado) bayaan ah, waxaana ku xoojinay Ruuxa Qudduuska ah."

Luukos 4:1 Ciise waxaa ka buuxsamay Ruuxa Qoduuska ah, oo Webi Urdun ayuu ka noqday, oo Ruuxii baa cidlada u kaxeeyey."

## DABEECADDA AAN DEMBIGA LAHAYN EE CIISE

Suuradda #19 Maryan: 17, 19
"Waxaan iyada u soo dirnay Ruuxeena, wuxuuna iyada u noqday mid u eg nin kaamil ah. Wuxuuna yidhi, 'waxaan ahay oo kaliya rasuulka Rabbiga inaan kuugu deeqo wiil aan qalad lahayn."

Cibraaniyada 4:14; 7:28
"Waayo ma aynu lihin wadaad sare oo aan itaaldarradeena ka nixi karin, laakiin waxaynu leenahay mid si walba loo jirrabay sideena oo kale, oo aan weliba dembi lahayn. Waayo sharcigu niman itaal daran ayuu wadaaddo sare ka dhigaa, laakiin hadalka dhaarta oo sharciga ka dambeeyay wuxuu ka dhigaa wiil weligiis kaamil ah."

## MUCJISOOYINKII CIISE

Suuradda #2 Baqara: 87
"Waxaan siinay Ciise, ina Maryama (calaamado) bayaan ah, waxaana ku xoojinay Ruuxa Qudduuska ah."
Suuradda #29 Ankabut: 50
"Waxay weliba yiraahdaan: 'Maxaa calaamado xagga Rabbigiisa ah loogu soo diri waayey Isaga? Bal eeg: "Calaamadaha waxay runtii la jiraan Ilaah, anigana runtii waxaan ahay nin bayaan u diga."

Yoxaana 3:2 "Isagu habeenkuu u yimid Ciise, wuxuuna ku yiri, Macallimow, waanu ognahay inaad tahay Macallin ka yimid Ilaah, waayo, nina ma samayn karo calaamooyinkan aad samayso haddaan Ilaah la jirin."

## CIISE WUU OGAA MUSTAQBALKA

Suuradda #43 Zukhruf: 61, 63
"Ciisena wuxuu noqon doonaa calaamadda imaanshaha saacadda xukunka: sidaas darted, shaki haka qabina (saacadda), laakiinse i soo raaca; kani waa jidka toosan." Markuu Ciise la yimid calaamado bayaan ah, wuxuu yiri, "Hadda waxaan idiinla imid caqli, oo si aan bayaan idiinkaga dhigo (arrimaha) qaarkood aad ku murantaan: sidaas darteed, Ilaahay ka baqa oo aniga i addeeca."

Matayos 24:29-31 "Laakiinse dhibta wakhtigaas dabadeed, kolkiiba qorraxdu waa madoobaan doontaa, dayuxuna ma nuuri doono, xiddiguhuna cirka waa ka soo dhici doonaan, xoogagga cirkana waa la gariirin doonaa. Markaasaa waxaa cirka ka soo muuqan doona calaamadda Wiilka Aadanaha, markaas ayaa qolooyinka dhulka oo dhammu barooran doonaan, oo waxay arki doonaan Wiilka Aadanaha oo daruuraha cirka ku imaanaya isagoo leh xoog iyo ammaan wayn. Oo wuxuu soo diri doonaa Malaa'igihiisa oo wata buun wayn oo kuwuu doortay ayay kasoo ururin doonaan afarta jahood cirka meesha ugu fog ilaa meesheeda kale."



## DHEXDHEXAADIYE

Suuradda #39 Zumar: 44
"Dheh: Ilaah ayaa iska leh (xaqa lagu baxsho) dhexdhexaadinta: Isaga ayey u sugnaatay xukunka samooyinka iyo dhulka: Ugu dambaysta, Isaga ayaa laydiin soo celin doonaa."

1 Timoteyos 2:5 "Waayo waxaa jira Ilaah keliya iyo dhexdhexaadiye kaliya oo u dhexeeya Ilaah iyo dadka, waana ninka Ciise Masiix."

## QAWLKA ILAAH

Suuradda #3 Al-Cimraan: 45 "Bal eeg, Malaa'igtii ayaa tiri: Maryaney! Ilaah wuxuu ku siinayaa bishaaro farxad leh oo ah Qawlka Isaga ka yimid: Magaciisa wuxuu noqon doonaa Ciise Masiix."

Yoxaana 1:1,14 "Bilowgii waxaa jiray Ereyga, Ereyguna jir buu noqday, oo waa ina dhex joogay, oo waxaan aragnay ammaantiisa, taas oo ahayd tan Wiilka kaliya ee Aabbaha, ee nimco iyo run ka buuxa."

## DHIMASHADA CIISE

Suuradda #3 Al-Cimraan: 55
"Markuu Ilaah yiri, Ciisow waxaan kuu keeni doonaa dhimasho oo waxaan darajo sare kuugu qaadi doonaa xaggayga, oo waxaan kaa saari doonaa kuwa aan ku rumaysan, oo kuwa ku rumaystana waxaan ka saremarin doonaa kuwa aan ku rumaysan maalinta qiyaamaha."

Filiboy 2:8 "Oo markuu nin u ekaaday, ayuu is hoosaysiiyay oo addeecay inuu dhinto, xataa inuu iskutallaabta ku dhinto."

## SAREKICIDDII CIISE

Suuradda #3 Al-Cimraan:55 "Markuu Ilaah yiri, Ciisow, waxaan kuu keeni doonaa dhimasho, oo waxaan darajo sare kuugu qaadi doonaa xaggayga."

1 Korintos 15:3-5 "Waayo, markii ugu horraysay, waxaan idiin dhiibay waxaan aniguba helay, oo waxa weeye, Masiixu wuxuu u dhintay dembiyadeena sida Qoriinku leeyahay. Waa la aasay Isaga, oo maalintii saddexaad ayaa la sarekiciyay, sida Qoriinku leeyahay. Markaasuu Keeyfas u muuqday, markii dambena laba iyo tobankii."

## KOR AYUU AADAY DHIMASHADA KADIB

Suuradda #3 Al-Cimraan:55 ". . . Ciisow, oo waxaan darajo sare kuugu qaadi doonaa xaggayga."

Efesos 1:19-20 "Sida uu u shaqeeyo xooga itaalkiisa ee uu kaga shaqeeyey Masiix, goortuu kuwii dhintay ka soo sarekiciyay, oo uu fadhiisiyay meelaha jannada xagga midigtiisa."

## MIDKA WAX ABUURAY

Suuradda #5 Maidah:113,114 "Markaasuu Ilaah oran doonaa Ciise, ina Maryanow! Xusuuso asxaankayga xaggaaga iyo xagga hooyadaa. Bal eeg, waxaan kugu xoojiyay Ruuxa Qudduuska ah, sidaas darteed ayaad ula hadashay dadka caruurnimadaada iyo Adiga oo wayn. Bal eeg, waxaan kubaray Kitaabka iyo xigmadda, sharciga iyo Injillka. Oo Bal eeg samaysay qaabka shimbir. Waxaad bogsiisay kuwa indhola'aanta ku dhashy iyo baraslayaasha Aniga fasaxayga. Bal eeg! Waxaad soo noolaysay kuwa dhintay aniga fasaxayga."

Kolosay 1:16-17 "Waayo, wax kastaba Isaga, ayaa uumay, waxyaalaha samooyinka ku jira, iyo waxyaalaha dhulka joogaba, waxyaalaha la arki karo iyo waxyaalaha aan la arki karinba, hadday yihiin carshiyo, ama sayidnimo ama madax ama amarro: wax walba Isagaa uumay oo loo uumay. Isagu wax kastaba wuu ka horreeyaa oo wax kastaaba Isagay isku haystaan."

Yoxaana 1:3-4 "Wax walba waxaa laga sameeyey xaggiisa, oo wixii la sameeyey lama samayn isaga la'antiis. Isaga waxaa ku jirtay nolol, noloshuna waxay ahayd nuurka dadka."



## CIISE MASIIX MARKALE AYUU IMAN DOONAA

Suuradda #43 Zukhruf: 61 "(Ciise) wuxuu calaamad u ahaan doonaa (imaanshaha) saacadda (xukunka). Haddaba wax shaki ah ha ka qabina (saacadda). Laakiinse aniga i soo raaca: Kani waa jidka toosan."

Falimaha Rasuullada 1:10-11 "Oo intuu sii socday, iyagoo samada aad u fiirinaya ayaa waxaa isasoo ag taagay laba nin oo dhar cadcad qaba, oo waxay ku yiraahdeen, Nimankiinan reer Galiliyo, maxaad la taagan tihiin oo aad samada u eegaysaan? Ciisahan samada laydiinka sareqaaday, sidaad u aragteen isagoo samada u socda oo kale ayuu u iman doonaa."

**Ciise nebi wuu ka waynaa.** (Cibraaniyada 1:4) "Isagoo aad uga wanaagsan malaa'igaha siduu u dhaxlay magac ka sii wanaagsan kooda."
**Ciise wuu ka waynaa Ibraahim.** (Yoxaana 8:58) "Ciise wuxuu ku yidhi, Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Intaan Ibrahim jirin anaa ah."
**Ciise wuu ka waynaa Muuse.** (Cibraaniyada 3:3) "Waayo, waxaa isaga lagu tiriyey inuu istaahilo ammaan ka badan tii Muuse, sida kan guriga dhisaa uga murwad badan yahay guriga."
**Ciise wuxuu Ilaah ku yiri:** (Yoxaana 17:5) "Adiga qudhaadu igu ammaan ammaantaan kula lahaa intaan dunidu jirin."
**Ciise wuxuu xertiisa ku yiri:** (Yoxaana 8:23) "Idinku waxaad tihiin kuwa hoosta, aniguse waxaan ka mid ahay kuwa sare. Idinku waxaad tihiin kuwa dunidan, aniguse mid kama ihi kuwa dunidan." Afar iyo tobankaas waxyaalood oo aan kor ku soo sheegay, ma ku arki kartaa in dabeecaddiisa ay ka wayn tahay tan bini aadanka?

## WAA MAXAY SABABTA UU CIISE U YIMID?

Qaybta 3

## MUXUU U YIMID CIISE

(Jacaylka Furashada Leh ee Ilaah)

Haddaad eegto nebiyadii Ilaah, Nuux wuxuu noolaa 950 sanadood, Kulligood waxay soo mareen nolol cimri dheer oo faa'iido leh. Hase ahaatee, casrigan hadda la joogo cimriga dadku waa 70 sanadood oo keliya. Waa marar dhif ah hadduu qofku gaadho boqol sanadood iyo wax ka badan! Maxaa sabab u ah dib u dhacaas wayn? Ilaah wuxuu leeyahay dembi ayaa sabab u ah. (Maahmaahyadii 10:27) "Rabbiga ka cabsashadiisu cimrigay dheeraysaa." In la addeeco amarada Ilaah waxay dheeraynaysaa cimrigaaga, waxayna kuu keenaysaa barwaaqo.



(Maahmaahyada 3:1,2) (1 Butros 3:10-12) "Kii doonaya inuu nolol jeclaado, oo arko maalmo wanaagsan, carrabkiisa shar ha ka joojiyo, bishimihiisana yaanay khiyaano ku hadlin. Oo ha ka leexdo shar, oo wanaag ha sameeyo; Nabad ha doondoono oo ha raacdaysto; waayo Rabbiga indhihiisu waxay fiiriyaan kuwa xaqa ah, dhegihiisuna waxay u furan yihiin baryadooda; laakiin wejiga Rabbigu waa ka gees kuwa sharka sameeya."

### Waa maxay dembi?

(Maahmaahyadii 5:21-23). "Waayo, jidadka dadku waxay horyaallaan indhaha Rabbiga oo isagaa fiiriya waddooyinkiisa oo dhan. Kan sharka leh waxaa qabsan doonta xumaantiisa, oo waxaa isaga lagu soo xidhi doonaa xadhkaha dembigiisa. Wuxuu u dhiman doonaa edbin la'aanta, oo isagu wuxuu ku dhex amban doonaa badnaanta nacasnimadiisa."

### Ilaah wuxuu dembiga u fasirayaa sidatan:

1. Ficil shar ah oo raali laga yahay: In la sameeyo ficil aan wanaagsanayn oo aan waafaqsanayn shariciga. (1 Yoxanna 3:4) "Kii kasta oo dembi falaa wuxuu falaa caasinimo; oo dembigu wuxuu yahay caasinimo."
(Cibraaniyada 12:1) "Sidaas daraaddeed, innagoo haysanna markhaatiyaal badan oo sida daruur u weyn oo inagu wareegsan, aynu iska dhigno culays kasta iyo dembiga dhibyaraanta inoogu dhegaya, oo aynu adkaysasho ku orodno tartanka ina horyaal."

2. Wax waajib ah oo aad raalligaaga uga tagto: Adigoo og inaad samayso wax waajib kugu ah inaad samaso, oo aadan samayn. (Yacquub 4:17) "Haddaba kii garanay inuu wax wanaagsan sameeyo laakiin aan samayn, dembi bay u tahay isaga."

3. Mabda' fallaaganimo ah ama dabeecad aan wanaagsanayn oo rumaysad la'aan ama shaki ah. (Yacquub 1:15) "Dabadeed damacu kolkuu uuraysto wuxuu dhalaa dembi, dembiguna kolkuu weynaado wuxuu keenaa dhimasho." (Rooma 14:23) "Oo wax kastoo aan rumaysadka ka imaaninu waa dembi."

4. Xaalad aan habboonayan oo xaqdarro ah ama caddaalad darro ah: (1 Yoxaana 1:18) "Haddaynu nidhaahno, Dembi ma lihin, nafsaddeenna ayaynu khiyaanaynaa, oo runtuna inaguma jirto." (1 Yoxanna 5:17) "Xaqdarrada oo dhammu waa dembi."

## Bini aadanku Wuxuu u Baahan Yahay Badbaadiye.

Bini aadanku wuxuu ku jiraan xaalad baaba' ama burbur ah, wuxuuna ku jiraa eed. (Rooma 3:10-12) "Sida qoran, mid xaq ahu ma jiro, midnaba; Mid wax garanayaa ma jiro; mid Ilaah doondoonaa ma jiro; dhammaantood gees bay u wada leexdeen, waxay wada noqdeen wax aan wax tar lahayn; mid wanaag falaa ma jiro, midnaba." Heerka Ilaah ee wanaagsan waa mid kaamil ah, haddaba waa inuu nagu xukumaa inaan nahay dad aan kaamil ahayn.

Bini aadanku gebi ahaan wuu doorsoomay, niyaddana way iska beddeleen oo musuqmaasuq ayay noqdeen. (Rooma 1:28-32) "Intay oggolaan waayeen inay Ilaah ku sii haystaan aqoontooda, Ilaah wuxuu u daayay maan dulli ah inay sameeyaan waxyaalo aan qummanayn, iyagoo ay ka buuxaan xaqdarrada, iyo sharnimada, iyo damacnimada, iyo xumaanta oo dhammu; waxaa kaloo ay ka buuxaan xaasidnimada, iyo dilidda, iyo ilaaqda, iyo khiyaanada, iyo camalxumaanta, oo waxay yihiin kuwa wax xun ku faqa, iyo kuwa wax xanta, iyo kuwa Ilaah neceb, iyo kuwa wax caaya, iyo kuwa kibirka badan, iyo kuwa faanka badan, iyo kuwa wax shar ah hindisa, iyo kuwa waalidkood caasiga ku ah, iyo kuwa garaadka la', iyo kuwa axdiga jebiya, iyo kuwa aan kalgacaylka lahayn, iyo kuwa aan naxariista lahayn. Iyagoo garanaya qaynuunka Ilaah in kuwa waxyaalahaas sameeyaa ay dhimasho istaahilaan, ayaanay samayn waxyaalahaas oo kaliya ee weliba waxay u bogaan kuwa sameeya."

Bini aadanka jab ayaa ku dhacay, oo waa laga qaaday asxaanka Ilaah iyo xiriirkii ay la lahaayeen Ilaah. (Ishaaciya 59:2) "Laakiinse xumaatooyinkiinnaa idin kala soocay idinka iyo Ilaahiinna, oo dembiyadiinnaa wejigiisa idinka qariyey, oo saasuusan idiin maqlin."

Rooma 3:23 Waxay sheegaysaa xaaladda uu Ilaah ku arko bini aadanka oo kooban - inay yihiin kuwo xagga Ruuxa ka dhintay.



(Rooma 3:23) "Maxaa yeelay, dhammaan way wada dembaabeen oo gaadhi waayeen ammaanta Ilaah."

Taasi waxa weeye dadka oo dhan. Maadaama uu bini aadanku yahay, dembiile, wuxuu u baahan yahay Badbaadiye, mid u sameeya wax uu Ilaah oo keliya u samayn karo.

## Eedda Dembigu - Waa Dhimasho.

(Bilowgii 2:17.) Ilaah wuxuu ku yidhi Aadan iyo Xaawo: "Laakiin geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta waa inaanad waxba ka cunin: waayo, maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa." (Rooma 6:23) "Waayo, mushahaarada dembigu waa dhimashada . . ."

Ilaah ma wuxuu nooga tagay jawaab la'aan? Ma wuxuu nooga tagay baaba' aan rajo lahayn? Jawaabtu waa maya! Ilaah wuxuu ina siiyay jawaab caqliga gali karta, jawaabta keliya ee suurogalka ah.

## Daawada Ilaah - Waa Dhiig Aan Eed Lahayn.

Ilaah wuxuu yiri, " Inta badan wax walba waxaa lagu nadiifiyaa dhiig sida sharcigu leeyahay, oo dhiigdaadin la'aan dembidhaaf ma jiro." (Cibraaniyadda 9:22) Markuu Aadan dembaabay, Ilaah wuxuu na siiyay xayawaan allabari ahaan loo baxsho, kaasoo cusboonaysiiyay jidkii ay ku heshiiyeen Ilaah Quduus ah iyo bini aadan dembiile ah.

Sannadkiiba hal mar Muslimiintu waxay u dabbaaldagaan iidda la yidhaahdo iiddul Adxaa (Kabiir). Wakhtiga iiddaas lagu jiro, qoys walba wuxuu bireeyaa xoolo. Waxay xusuusanayaan in Ilaah uu wan yar u soo diray nebi Ibraahim inuu bireeyo beddelkii wiilkiisa. Ilaah wuxuu sheekadan nagu siiyay sawir ku saabsan furashadiisa dembiga. Ilaah wuxuu na baray mabda'a allabariga oo beddelkeenna galaya. Allabariga waxaan ka arkaynaa baahida ku saabsan in dhiig la daadiyo. Eedda dembiga waa in la baxshaa. Su'aashu waxaa weeye: Ma innaga qudheennaa eedda dembiga ku bixinayna dhimasho ama in wax kale aan beddelkeenna galinno mise waxaan u oggolaanaa Ilaah inuu eeddaas ku baxiyo allabari kale sida wankii uu u keenay nebi Ibraahim si uu beddelka wiilkiisa u galo?

Ilaah wuxuu u soo diray Ciise Masiix, inuu allabari u noqdo dembigeena iyo dembiga adduunka oo dhan. Ciise wuxuu u yimid inuu naga badbaadiyo eedda dembiga. (2 Korintos 5:21) "Wuxuu isaga oo aan dembi aqoonin ka dhigay inuu dembi noqdo aawadeen, inaynu noqonno xaqnimada Ilaah ee ku jirta Isaga." (Cibraaniyada 10:11,12,14) "Wadaad waluba maalin kastuu istaagaa isagoo adeegaya oo marar badan bixinaya allabariyo isku mid ah, kuwa aan marnaba dembiyo qaadi karin, laakiin Isagu (Ciise Masiixi) kolkuu allabari keliya mar keliya dembiyo u bixiyey. Maxaa yeelay, bixin keliya ayuu kaamil kaga dhigay weligood kuwa quduus laga dhigay."

## Waxaan aragnay in Ilaah uu yiri:

1. Dhammaan way dembaabeen.
2. Ciqaabta dembigu waa dhimasho.
3. Ilaah wuxuu xaqnimo nagu siiyay furasho allabari.
4. Allabariga Masiixa waa furashada kaamilka ah.

## Nololsha Cusub iyo Cafisku - Waa Hadiyad

(Efasos 2:8,9) "Waayo, idinku waxaad ku badbaadeen nimco xagga rumaysadka, mana aha wax xaggiinna ka yimid, laakiinse waa hadiyadda Ilaah, mana aha xagga shuqullada, si aan ninna ugu faanin." Aayaddanu waxay noo horseedaysaa in aan go'aan gaadhno. Nolosha cusub waa hadiyad Ilaah ka timid. Hadiyad waa hadiyad, ma aha inaad shaqaysatid ama wax bixisid. Ma jiraan waxyaabo wanaagsan oo aad samayn karto si aad u helshid hadiyaddaas. Waad qaadanaysaa oo keliya. Innagoo garanayna inaynaan qudheenu isku fillaan karin, waxaan qaadanaynaa hadiyadda Ilaah uu nagu siinayo nolosha xagga Masiixa. Rooma 10:9-14 Oo Qawlka Ilaah ka mid ahu waxay inoo sheegaysaa sidaan hadiyaddaas ku heli lahayn: "Maxaa yeelay, haddaad afka ka qiratid in Ciise yahay Rabbiga, oo aad qalbiga ka rumaysatid in Ilaah isaga ka sarekiciyey kuwii dhintay, waad badbaadi doontaa, waayo, qalbiga wax baa laga rumaystaa xagga xaqnimada, afkana wax baa laga qirtaa xagga badbaadinta. Waayo, Qorniinku wuxuu leeyahay, ku alla kii rumaysta Isaga, ceeboobi maayo. Waayo, ku alla kii magaca Rabbiga ku baryaa waa badbaadi doonaa."



## Ilaah wuxuu yidhi afar waxyaabood waa lagama maarmaan si loo badbaado:

1. Waxaad u baahan tahay inaad hesho qof wax kaaga sheega Ciise Masiix.
2. Waa inaad raalli ka tahay inaad maqasho.
3. Waa wax loo baahan yahay inaad rumaysato in Ilaah u soo diray Ciise Masiix inuu galo baddelkaaga, isagoo kaa qaadaya eeddii dhimashada ee dembigaaga.
4. Waa inaad wax ka qabataa rumaysadkaas adigoo ugu yeedhaya Ciisa Masiix inuu ku badbaadiyo.

(Rooma 10:13) "Waayo, ku alla kii magaca Rabbiga ku baryaa, waa badbaadi doonaa." Aayaddan waxay noo sheegaysaa markaan Ciise Masiix ugu yeedhno inuu ina badbaadiyo, wuxuu samaynayaa sidaas. Xusuuso, Ilaah wuu ogyahay qalbigaaga. Tukashada soo socotaa waxay tusaysaa siduu qofku ugu yeedhi lahaa Ciise Masiix inuu badbaadiyo:

"Ilaahayoow, waxaan kuugu yeedhayaa inaad i badbaadiso. Waxaan rabaa Ciise Masiix inuu noqdo Badbaadiyaha naftayda iyo allabariga dembiyadayda, kuwaas oo aad ka xumaatay Adigu, oo sabab u noqday kala taggeena.

Waxaan doortay inaan ku rumaysto Adiga, dhimashada aad ii dhimatay iyo hadiyaddaada nolosha daa'imka ah, taasoo ahayd isla awooddii aad Ciise Masiix uga sarekicisay dhimashadii uu ku dhintay iskutallaabta korkeeda.

Anigoo ku salaynaya wixii uu Masiixu sameeyay, waxaan kuu soo gudbinayaa codsigan. Aamiin"

**Haddaad waydiisatay Ilaah inuu ku badbaadiyo**
**Ama**
**Haddaad wax su'aal ah qabtid**
**Ama**
**Haddaad doonayso inaad wax kale oo badan ogaato,**
**Fadlan noo soo qor.**

"Haddii naftiina shaki ku jirto, oo ku saabsan waxyaabahaan idiin muujinay, markaas waydiiya kuwii Kitaabka idinka hor akhristay." Suuradda #10 Yunus: 94